
AF-SOOMAALI

MAWDUUC

Xayawaanka

Xoolaha, duurjoogta iyo dabeecadda



Magaca _____

HOYGAAFKA

Instagram | TikTok | Facebook

@hoyga_afka

EREYADA

Ereyada xayawaanka

Baro magacyada xayawaanka. Hoostooda waxaa ku qoran erayga af-Deenishka.



geel

kamel



ri'

ged



lax

får




sac

ko



faras

hest



dameer

æsel



eey

hund




bisad

kat



libaax

løve



maroodi

elefant



geri

giraf



dameer-farow

zebra



digaag

høne



kalluun

fisk



mas

slange



shinni

bi

CILMIGA

Kooxaha xayawaanka

Saynisyahannadu xayawaanka waxay u kala qaybiyaan kooxo, iyagoo eegaya sida jirkoodu u samaysan yahay iyo sida ay u dhalaan.



Naasleyda *pattedyr*

Waxay dhalaan ubad nool, ubadkuna wuxuu nuugaa caanaha hooyadiis. Jirkooda badanaa waxaa ku yaal timo ama dhogor.

Tusaale: geel, libaax, maroodi, bini'aadamka



Shimbiraha *fugle*

Jirkooda waxaa ku yaal baalal, waxayna leeyihiin laba lugood. Waxay dhalaan ukumo, intooda badanna way duulaan.

Tusaale: digaag, gorayo, gorgor



Xamaaratada *krybdyr*

Maqaarkoodu wuxuu leeyahay qolof. Waxay dhalaan ukumo. Jirkoodu wuxuu kululaadaa qorraxda.

Tusaale: mas, yaxaas, diin



Kalluunka *fisk*

Waxay ku nool yihiin biyaha. Ogsijiinta waxay ka qaataan biyaha, waxayna ku dabaashaan baalal.

Tusaale: kalluun, libaax-badeed (haj)



Laba-noolayaasha *padder og frøer*

Waxay ku noolaan karaan biyaha iyo dhulka labadaba. Ubadkoodu wuxuu ku dhex koraa biyaha.

Tusaale: rah



Cayayaanka *insekter*

Waxay leeyihiin lix lugood. Jirkoodu wuxuu ka kooban yahay saddex qaybood.

Tusaale: shinni, balanbaalis, qudhaanjo




Ma ogtahay?

Bini'aadamku sidoo kale waa naasley! Waxaan dhalnaa ubad nool, carruurta yaryarna waxay cabbaan caano.

DHAQANKA

Xoolaha iyo geela Soomaalida

Muddo kun sano ah, Soomaalida badankood waxay ahaayeen **xoolo-dhaqato** — dad ku nool xoolahooda, oo meel ilaa meel u guura si ay u helaan biyo iyo daaq. Ilaa maanta, xoolaha waxay muhiim u yihiin dhaqaalaha iyo dhaqanka Soomaaliya.



Xoolaha Soomaalida waxaa ugu muhiimsan **geela**, **ariga** (riyaha iyo idaha) iyo **lo'da**. Soomaaliya waxay ka mid tahay waddamada geela ugu badan adduunka.

Maxaa geela u gaar ah?

Kurusku

Kuruska geelu kuma jiraan biyo — waxaa ku jira **baruur**. Marka cunto la waayo, geelu baruurtaas ayuu tamar ahaan u isticmaalaa.

Biyaha

Geelu wuxuu ku noolaan karaa **laba toddobaad** isagoon biyo cabbin. Marka uu biyo helo, wuxuu cabbi karaa ilaa **100 litir** dhowr daqiiqo gudahood.

Ciidda

Geelu wuxuu leeyahay baalal-indhood dhaadheer, sankiisana wuu xiri karaa. Sidaas ayuu iskaga ilaaliyaa ciidda iyo dabaysha.

Caanaha

Caanaha geelu waa cunto muhiim u ah dad badan oo Soomaali ah. Waxay leeyihiin nafaqo badan.


Isku day!
Weydii qof waayeel ah oo qoyskaaga ka mid ah: Ma lahaayeen xoolo? Waa maxay sheeko ay ka xasuustaan geela ama xoolaha?

EREYADA XOOLAHA

Lab, dheddig iyo ubad

Afka Soomaaligu wuxuu leeyahay erayo aad u badan oo xoolaha ku saabsan. Xayawaan kasta wuxuu leeyahay magac gaar ah oo loogu yeero labka, dheddigga iyo ubadka.

Xoolaha	Lab	Dheddig	Ubad
Geel (kameler)	awr	hal	nirig
Lo' (kvæg)	dibi	sac	weyl
Riyo (geder)	orgi	ri'	waxar
Ido (får)	wan	lax	baraar



Erayada kooxda

Soomaalidu waxay leeyihiin erayo loogu yeero xoolaha marka ay wada joogaan:

xoolo	husdyr, kvæg	***ari***	geder og får
geel	kameler	**lo'**	køer, kvæg

Ma ogtahay?
Erayga **geel** waa eray kooxeed — wuxuu tilmaamaa geel badan oo wada jira. Hal neef oo dheddig ah waxaa la yiraahdaa **hal**, mid lab ahna ***awr***.

DUURJOOGTA

Halkee ayay ku nool yihiin?

Xayawaanka duurjoogta ah waxay ku nool yihiin dabeecadda, ee kuma noola guryaha. Meesha xayawaanku ku nool yahay waxaa la yiraahdaa **deegaan**.


Soomaaliya iyo Geeska Afrika




Libaax
duurka



Haramcad
bannaanka



Geri
duurka



Maroodi
kaymaha iyo duurka



Dhurwaa
duurka



Dameer-farow
bannaanka



Gorayo
bannaanka



Yaxaas
webiyada

Danmark



Dawaco
kaymaha (ræv)



Deero
kaymaha (rådyr)



Bakayle
beeraha (hare)



Shimbir
meel walba (fugl)

Ma ogtahay?
Haramcadku waa xayawaanka dhulka ugu dheereeya — wuxuu ordi karaa ilaa **110 km saacaddii**, laakiin muddo gaaban oo keliya.

CUNTADA

Maxay cunaan?



Geedo-cune

Wuxuu cunaa dhir oo keliya: caws, caleemo iyo miro. **Tusaale:** geel, geri, maroodi, bakayle.



Hilib-cune

Wuxuu ugaarsadaa oo cunaa xayawaan kale. **Tusaale:** libaax, haramcad, yaxaas.



Wax walba cune

Wuxuu cunaa dhir iyo hilib labadaba. **Tusaale:** dhurwaa, dawaco, bini'aadamka.

Silsiladda cuntada

Silsiladda cuntadu waxay muujisaa cidda cidda cunta. Dhirta waxay tamar ka helaan qorraxda. Bakaylaha ayaa cuna dhirta, dawacaduna waxay cuntaa bakaylaha.



Doog





Bakayle





Dawaco

Ilaalinta xayawaanka

Xayawaan badan ayaa khatar ku jira. Dadku waxay ugaarsadaan **maroodiyada** si ay u helaan foolka, waxayna xadaan ubadka **haramcadka** si ay u iibiyaan. Caagga badda lagu tuuro waxaa cuna **diinka badda**, kuwaas oo moodaya inay yihiin cunto.



Isku day!
Sidee adigu u ilaalin kartaa xayawaanka? Ha tuurin qashinka dabeecadda, isticmaal caag yar, oo xayawaanka si naxariis leh ula dhaqan.

01 Isku xir

Xariiq ku xir sawir kasta iyo erayga saxda ah.

	gorayo
	yaxaas
	maroodi
	haramcad
	geri

02 Qor erayga

Xayawaanku waa maxay? Magaciisa ku qor xariiqda.



_____



_____



_____



_____



_____



_____

03 Kala saar

Ku qor xayawaan kasta kooxda saxda ah.

Ereyada: libaax | digaag | mas | kalluun | shinni | geel | gorayo | yaxaas | balanbaalis | rah

Naasley	Shimbir	Xamaarato
_____	_____	_____
_____	_____	_____

Kalluun	Laba-noole	Cayayaan
_____	_____	_____
_____	_____	_____

04 Dhammaystir shaxda

Qor magaca labka, dheddigga iyo ubadka.

Xoolaha	Lab	Dheddig	Ubad
Geel	_____	hal	nirig
Lo’	dibi	_____	_____
Riyo	_____	ri’	_____
Ido	wan	_____	_____

05 Run mise been?

Akhri jumladda, kadibna calaamadee “Run” ama “Been”.

	Jumladda	Run ✓	Been ×
1	Kuruska geela waxaa ku jira biyo.	☐	☐
2	Geelu wuxuu cabbi karaa ilaa 100 litir dhowr daqiiqo gudahood.	☐	☐
3	Shimbiruhu waxay dhalaan ukumo.	☐	☐
4	Libaaxu waa geedo-cune.	☐	☐
5	Cayayaanku waxay leeyihiin lix lugood.	☐	☐

06 Dooro jawaabta saxda ah

Goobaabi jawaabta saxda ah.

a Xayawaanka dhulka ugu dheereeya waa:

◯ maroodi ◯ haramcad ◯ geri

b Meesha xayawaanku ku nool yahay waxaa la yiraahdaa:

◯ deegaan ◯ daaq ◯ duul

07 Silsiladda cuntada

Ku qor lambarrada 1 ilaa 3 si ay u noqdaan silsilad cunto oo sax ah.


☐ Libaax

☐ Caws

☐ Dameer-farow

08 Xayawaankaaga

Dooro xayawaan aad jeceshahay. Sawir, kadibna ka jawaab su'aalaha.



a Magaca xayawaanka:

b Kooxda uu ka tirsan yahay:

c Halkee buu ku nool yahay?

d Maxuu cunaa?

09 Ilaali xayawaanka

Qor laba waxyaalood oo aad samayn karto si aad u ilaaliso xayawaanka iyo dabeecadda.

10 Su'aal dhaqan

Waa maxay sababta geelu muhiim ugu yahay Soomaalida? Ku qor saddex sababood.

HOYGAAFKA

UNDERVISNINGSHÆFTE PÅ SOMALISK

Xayawaanka

Et temahæfte på somalisk om dyr. Barnet lærer dyrenavne, dyregrupper, hvor dyrene lever, hvad de spiser, og hvorfor dyr skal beskyttes – og om kamelens og husdyrenes store betydning i somalisk kultur.

Hvert opslag har danske oversættelser af de vigtigste ord, så hæftet kan bruges i modersmålsundervisningen og derhjemme.

Sprog	Somalisk
Alder	10–15 år
Sider	12 sider med 10 opgaver

Tusmada

Ereyada xayawaanka	2
Kooxaha xayawaanka	3
Xoolaha iyo geela	4
Lab, dheddig iyo ubad	5
Halkee ayay ku nool yihiin?	6
Maxay cunaan?	7
Laylisyo	8–11

Følg os, og find flere bøger og spil

INSTAGRAM
@hoyga_afka
instagram.com/hoyga_afka

TIKTOK
@hoyga_afka
tiktok.com/@hoyga_afka

FACEBOOK
Hoyga Afka
facebook.com/HoygaAfka

WEBSHOP
Bøger og spil
hoyga-afka-rjpq.vercel.app

Scan koden med mobilens kamera

© 2026 Hoyga Afka. Alle rettigheder forbeholdes.